



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Diisambar 15, 2020

Ku socota: Dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka, qoysaskooda iyo asxaabtooda

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Xilliga Fasaxa iyo Ka dhigista Dadka la isku dhow yahay kuwo Badbaado leh

Xilliga fasaxu waa mid kuwo badan oo inaga mid ahi ay filaan sanad kasta – oo ah waqti la dabaaldego oo lala joogo qoyska iyo asxaabta.

Si kastaba ha ahaatee, sanadkani waxaanu dabaaldegaynaa inagoo sidoo kale ogsoon in ay tahay in aanu sameyno isbeddelo si qof kasta loo dhigo mid badbaado iyo caafimaad qaba.

Xogtu waa mid walaac leh. Dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka ayaa leh halis sare oo la xiriirta cudurka neefsashada, influenza ‘hargabka’ iyo infekshanka sambabada ku dhaca ‘pneumonia’ haddii ay qaadaan COVID-19. Gobolada qaarkood ayaa yeeshay [natiijooyin walwal leh](#), oo ay ku jiraan dadka qaba I/DD ay wax ka badan saddex jeer u badan tahay in ay u dhintaan haddii ay qaadaan COVID-19.

Dadka qaba I/DD ayay u badan tahay in ay ku nool yihiin goobo koox ahaan loo degan yahay waxayna sidoo kale u badan tahay in ay haystaan shaqaalaha taageerada oo badan, kuwaasi labada arrimoodba yihiin kuwo kordhiya halista soo gaarida COVID-19.

Ka hor inta aadan qaraabadaada ama saaxiibkaaga qaba naafanimada maskaxda ama korriinka u qaadin meel la iskugu imaanayo oo ka baxsan

gurigiisa, fadlan tixgelinta sii halista sare ee soo wajahaysa dadka qaba I/DD.

Isku day ka fikirka siyaabo hal-abuur leh oo loola xiriirayo dadka la isku dhow yahay inta lagu jiro fasaxyada iyada oo aan xubin ka tirsan qoyskaaga, ama dadka ay guriga wadaagaan, ama shaqaalaha daryeelka bixiya la galinaynin halis. Qabo tartanka funaanada fool xumada badan oo lala leeyahay xubnaha ka tirsan qoyska ama qabo xaflad cunto oo ah dhanka muuqaalka internet-ka halkaasi oo qof kastaa xiiseeyo cunto la jecel yahay. [Maqaalkan ka socda CNN](#) ayaa leh fikrado kale.

Haddii aad doorato in aad qof la isku dhow yahay oo qaba I/DD u qaado gurigaaga ama meelo kale oo la iskugu yimaado, daryeel bixiyayaasha ayaa codsan doona in la qaado tallaabooyin si ay gacan uga geystaan ka dhigista qof kasta oo guriga jooga mid badbaado qaba, sida xaddidaada xiriir ka dhexeeya dadka iyo xubnaha kale ee ka tirsan guriga in muddo ah, cuntada oo waqti kala gooni ah la cuno iyo in si dhow loola socdo astaamaha jirada.

Xilliyada fasaxa ee mustaqbalka waxaa ku jiri kara isku imaanshaha shakhsi ahaaneed sidii aan hore u sameyn jirnay, balse hadda, waa in aanu sameynaa wax kasta oo suurtagal ah si aan dadkeena aan isku dhow yahay uga dhigno kuwo badbaado iyo caafimaad leh.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.